

POLITI



SHAQADA BILAYSKA

- MUSTAQBALKA CARRUURTAADA?






”Waxa aan codsaday shaqada bilayska, waayo tan iyo carruurnimdaydii ayaan ku riyoonaayay. Waxa aan u arkayay shaqo fiican, oo qofku ka shaqaynayo dad ku jira xaalado kala duwan.”

Nurçan

”Waxbarashada bilaysku waa waxbarasho fiican, oo baaxad ballaadhan. Waxa aad ansixinaysaa naftaada xag shaqeed iyo xag shakhsiyad ahaaneedba, sidaas awgeed shaki kuma jiro, in aan qaatay go’aan sax ah, mar-kaan codsaday shaqada bilayska dheenishka.”

Nicolai



WAXA MUDAN IN LA OGAADO

- Ilaa boqolkiiba lix dadka Denmark, asalkoodu waxa uu ka soo jeedaa dalal aan reer galbeedka ahayn.
- Ilaa boqolkiiba hal keli ah ayaa ciidan-ka bilayska asalkoodu ka soo jeedaa dalal aan reer galbeed ahayn.
- Waxbarashada bilaysku waxa ay ku socotaa wax lagu magacaabo digriiga khibradeed (professionsbachelor), waxayna leedahay fursado ay ka mid yihiin inaad sii qaadan karto waxbarashooyinka dhaadheer.
- Shaqada bilaysku waa mid kalsooni leh. Ilaa boqolkiiba 95 dadka bilaaba waxbarashada bilayska, waxa la siiyaa shaqo joogto ah.
- Bilayska deenishka ilaa 75 ka mid ah ayaa loo diraa hawlo caalami ah, sida waxyaabo ay ka mid yihiin dhismaha bilayska dalalka kale.

Haddii aad rabto faahfaahin dheeraad ah:

www.blivpolitibetjent.dk
www.politi.dk

GACALIYAAL WAALID

Bilayska dheenishku waxa ay had iyo jeer raadiyaan dad jecel, in ay wax beddelaan, oo ka dhiga Danmark dal xasil-loon oo nabad ah.

Waxa aanu culays wayn saarnaa, in ciidanka bilayska ay ka wada muuqdaan qaybaha bulshadu, oo waxa aanu rabnaa askar badan oo garanaya luqado iyo dhaqamo kala duwan.

Sidaas awgeed ayaa aanu idiin soo abaaray. Waxa laga yaabaa in aad leedihiin wiil ama gabadh, ama aad garanaysaan dad kale, oo ku haboon in ay noqdaan bilays?

Waa shaqo xiiso leh, oo noocyo badan, oo ay ku soo wajahayaan waxyaabo faro wayni, waxa ay leedahay dakhli joogto ah iyo fursado fiican oo shaqeed – qofkuna ama waxa uu ka shaqeeyaa ka hortegista denbiyada ee carruurta iyo dhallinyarada, ama denbiyada ayuu baadhayaa ama baabuurta roondada ayuu kaxaynayaa ama waxa uu qabanayaa tuugada, dhaca iyo xadgudubka.



"Waxa laga yaabaa, inaad leedihiin wiil ama gabadh jecel, inay noqdaan bilays?"

Shaqada bilayska ayaa saamaysa qaybo badan oo bulshada ah, oo ahmiyad u leh dad badan. Sidoo kale waa shaqo la ixtiraamo, loona fuliyo qaab bilaysku ka helaan dadwaynaha kalsooni wayn.

Waa in ay sidan arrintu ku socoto. Sidaas awgeed waa muhiim, in askarta bilays-keenu leeyihiin karti, furfurnaani iyo soo dhawayn, leeyihiina isir iyo waayoaragnimo kala duwan.

Dhab ahaan cid kastaa ma noqon karto bilays. Faahfaahin dheeraad ah, oo la xidhiidha sida loo galo dugsiga bilayska, waxaad ka akhriyi kartaa bogga intarnetka [www. blivpolitibetjent.dk](http://www.blivpolitibetjent.dk).

Mahadsanid



Jens Henrik Højberg,
Taliyaha ciidanka bilayska

LA XIDHIIDH:

Bilayska xaafadda aad deggan tahay:

Taliska ciidanka bilayska

Xafiiska shaqo qorista

Politortvet 14

1780 København V.

Tel. 45 15 26 16

E-mail: adm-politiansoger@politi.dk

www.blivpolitibetjent.dk



POLITI

DANISH NATIONAL POLICE RECRUITING, 2011